[redacted]


# FAAFIN RASMIAH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

| Sannadka 4aad | Muqdisho, 10 Jennayo 1976 | L. 1 R. 1 |
|---|---|---|

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

**W. M.**

---

## BOGGA LABAAD


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 30 Nofembar 1975, L. 1 — *Ka Tanaasulid Jinsiyadda Soomaaliyeed.* — Bog. 40

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 25 Nofembar 1975, L. 2 — *Magacaabid Guddomiyeyaal Degmooyin.* — » 41

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 25 Nofembar 1975, L. 3 — *Magacaw Xoghayeyaal Guddiyo.* — » 42

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, 15 Disembar 1975, L. 4 — *Magacaabi Guddoomiyeyaal.* — » 43

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGARSIINTA, 10 Oktoobar 1975, L. 5 — *Laguna magacaabay Sannadka Haweenka.* — » 45


---


Madbacada Dawladda — Muqdisho

[redacted]



# BOGGA SEDDAXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OEGYSIIS WIXII LA MID AH

---


WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Canacsiga *«Abdulla Label». (1 Bis)* Bog. 46

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Abdulla» (Word mark in blooek letters). (2)* » 47

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Hacks» (Word mar in bloock letters). (3)* » 48

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Hacks Device». (4)* » 49

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Pertunal» (Word mark in bloock letters). (5)* » 50

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Clafanone» (Word mark in bloock letters). (6)* » 51

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Summadda Ganacsiga *«Philip Morris Red Label». (7)* » 52

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Black & White Label». (8)* » 53

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Plmm's No. 1, Cup» (Words and numeral). (9)* » 54

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Vodka Label». (10)* » 55

WASAARADDA WARSHADAHA, 16 Sebtember 1975 — Sumadda Ganacsiga *«Crosland» (Word). (11)* » 56

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Disembar 1975, *Beddelaad Naada Dhul Jaalle Axmed Muxamed Macallim. (12)* » 57

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Disembar 1975, — *Naada Dhul Jaalle Caasha Faarax Xasan. (13)* » 57

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11 Disembar 1975, — *Naada Dhul Jaalle Saciida Cadib Caateeye. (14)* Bog. 58

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Disembar 1975, — *Naada Dhul Jaalle Sheekh Maxamed Cabduraxman. (15)* » 59

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Disembar 1975, *Naada Dhul Jaalle Maxamed Diiriye Laalac. (16)* » 60

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 20 Disembar 1975, — *Naada Dhul Jaalle Maxamed Saalax Xuseen. (17)* » 61

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15 Jannayo 1976 — *Lumid jeega wareegga L. .012532, Shs. 700 u leyahay Xasan Ceelo Geedow. (17 Bis)* » 62

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 15 Jannayo 1976 — *Lumid Buugga Kaydka L. 11020 Shs. 3000 u leyhay Xasan Cabdullahi Cilmi. (17 Bis)* » 63

# BOGGA LABAAD

XEER L. 1 ee 30 Nofembar 1975.

Ka tanaasulid jinsiyadda Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii koowaa diyo tii labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969 iyo sharciga lambar 1 ee 21 Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Arjigii iyo xaashiyadii ku lifaaqnaa, uu ku weydistay Jaalle Maxamed Axmed Saalax inuu ka noqdo jinsiyaada Soomaaliyeed;

ASAGOO ARKAY Xogwaran Wasaaradda Arrimaha Gudaha lambar MG-12-A-4055 ee 23 settembar 1975;

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahaa GSK-2-A-2361, taariikhdeeduna ahayd 1 Oktoobar 1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, kuna saabsaneyd oggolaansho tanaasulka jinsiyadda Soomaaliyeed;

ASAGOO ARKAY Qodobka 11, qaybta (a), ee sharciga 22-12-1962 lambar 28 ee Jinsiyadda Soomaaliyeed;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Guudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Si degdeg ah in looga qaado Jinsiyadda Soomaaliyeed Jaalle Maxamed Axmed Saalax.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Jaalle Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka soo saxiixo, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 30 Nofembar 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda
Arrimaha Gudaha
*G. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

**XEER L. 2 ee 25 Nofembar 1975.**
**Magacaabid Guddoomiyeyaal Degmooyin.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aa, xarafka (L) ee sharciga lambarkiisu yahay 52-72, siina baxay 8dii Juun 1972kii;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyaal Degmooyinka Caabudwaaq, Gaalkacyo, Sablaale, Hargeysa, [illegible].

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Waxaa lagu magacaabay Saraakiisha magacqadoodu hoos ku qoran [illegible] Guddoomiyeyaal ka noqdaan Degmooyinka hoos ku qoran laga bilaabo taariikhda hortooda ku qoran:

1. Dhamme Daahir Sheekh Maxamed — Guddegmo Caabudwaaq 25 - 9 - 1975.
2. L. Xid. Axmed Jaamac Cali — Guddegmo Gaalkacyo 25 - 9 - 1975.
3. Dhamme Moxamed Xaaji Jimcaale — Guddegmo Sablaale 25 - 9 - 1975.
4. Jaalle Xaaji Bashiir Cali Qoslaaye — Guddegmo Baraawe 25 - 9 - 1975.
5. Jaalle Maxamed Cumar Maxamuud — Guddegmo Iskushuban 29 - 9 - 1975.
6. Jaalle Moxamed Maxamuud Moxamed Jeelle — Lughaye 20 - 10 - 1975.
7. Jaalle Cumar Salaad Cilmi — Guddegmo Hargeysa 7-91975.
8. Jaalle Moxamed Ciise Salwe — Guddegmo Sheekh 20-10-1975.
9. Jaalle Dhamme Ibraahim Cilmooge — Guddegmo Boosaaso 13 - 8 - 1975.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya si degdeg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Nfembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Moxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga.lamb. 191.*
*Muqdisho, 3 Dishembar 1975.*
*Hantidhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

XEER L. 3 ee 25 Nofembar 1975.
Magacaw Xoghayeyaal Guddiyo Degmooyin.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 13aad ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 lana soo saaray 8dii bisha Jun 1972;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Xoghayeyaal Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Iskushuban, B. Hakaba, Balcad, Dujuma, Cabuud Waaq.

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

In Shaqaalaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin ay ka noqdaan Xoghayeyaal Guddiyada Kacaanka Degmooyinka magacyadooda ku dhinac qoran yihiin: marka laga billaabo 25-10-1975.

1. Jaalle Axmed Faarax Xaaji — Xoghayaha G. K. Degmada Iskushuban.
2. Jaalle Cali Maxamuud Geedi — Xoghayaha G. K. Degmada B. Hakaba.
3. Jaalle Maxamuud Xasan — Xoghayaha Degmada G. K. Balcad.
4. Jaalle Cabdullahi Xareed — Xoghayaha G. K. Degmada Dujuma.
5. Jaalle Muxyadiin Islow Aybakar — Xoghayaha G. K. Degmada Caabudwaaq.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelaya si degdeg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 25 Nofembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
ee Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 192.*
*Muqdisho, 3 Dishembar 1975.*
*Hantidhawraha Guudu*
G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

XEER L. 4 ee 15 Dishembar 1975.

*Magacaabid Guddoomiyeyaal Degmo.*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ASAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1aad ee sharciga lambarkiisu yahay 52-72, soona baxay 8dii Juunyo 1972kii;

ASAGOO ARKAY Warqaddii lambarkeedu ahaa GSK-S-2-A-1488, taariikhdeedunua ahayd 15-12-1975, ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka, kuna saabsaneyd magacaabid Guddoomiyeyaal Degmo;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in loo magacaabo Guddoomiyeyaal Degmooyinka Jerriiban, Xarardhere, Ceel-dhere, Bender-beyla, Ceel-afweyn, Boorama, Ceel-waaq, Jamaama, Cadale, Sheekh. Belet-weyne, Garoowe, Wanle-weyne, Jilib iyo Kurtun-waarey.

## WUXUU GOOYEY

### Qodobka 1aad

Waxaa lagu magacaabay Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin inay Guddoomiyeyaal ka noqdaan Degmooyinka Sarkaal walba ku hr koran, marka laga bilaabo 15-12-1975:

1. Jaalle Maxamed Cumar Xuseen — Guddoomiye Degmada Jerriiban.
2. Jaalle Maxamed Xaaji Cumar — Guddoomiye Degmada Xarardheere.
3. Jaalle Maxamed Cabdullaahi Cawaale — Guuddoomile Degmada Ceel-dheere.
4. Jaalle Axmed Faroole Dhegeey — Guddoomiye Degmada Bender-beyla.
5. Jaalle Cabdullaahi Muuse Yuusuf — Guuddoomiye Degmada Ceel-afweyn.
6. Xidd. Maxamud Cali Bile — Guddoomiye Degmada Boorama.
7. Jaalle Daa'uud Cali Yaxya — Guddoomiye Degmada Ceel-waaq.
8. Jaalle Cabdiraxmaan Xuseen (Baydaani) — Guddoomiye Degmada Jamaama.

9. Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf — Guuddoomiye Degmada Cadale.

10. Jaalle Ibraahim Cilmi Warsame — Guddoomiye Degmada Sheekh.

11. Jaalle Axmed Sugulle — Guddoomiye Degmada Belet-weyne.

12. Jaalle Sheekh Xasan Saalax — Guuddoomiye Degmada Garoowe.

13. Jaalle Abshir Jaamac Fardi — Guuddoomiye Degmada Wanle-weyne.

14. Jaalle Cabdi Nuur Maxamuud — Guuddoomiye Degmada Jilib.

15. Jaalle Maxamed Ciise Salwe — Guddoomiye Degmada Kurtunwaarey.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu u dhaqan gelayaa si degdeg ah, waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Dishembar 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

*WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY*
*Diiwaanka lamb. 6, bogga lamb. 45.*
*Muqdisho, 25 Dishembar 1975.*
*Hantedhawraha Guud*
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

**XEER L. 5 ee 10 Dishembar 1975.**

**Laguna magacaabay Sannadka Haweenka.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Qodobka 22aad iyo kan 23aad ee Sharciga Boostada lambar 62 soona baxay 22-9-1972;

ISAGOO DHEGEYSTAY Talada Guddiga Filateliga;

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in la soo saro tigidh cusub oo lagu magacaabo «Sannadka Haweenka Adduunka»;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Qodobka 1aad

1. In la soo saaro tigidh cusub oo xus ah, laba qiime ah, midabna leh, laguna magacaabay «Sannadka Haweenka Adduunka» tigidhada waxa lagu soo daabacay Madbacadda Talyaaniga (Istituto Poligrafico dello Stato Roma).

2. Tigidhada waxa lagu sameeyey xaashiyo aan ahayn filigranata, qiyaastooduna waxay tahay 30x40 mm. tigidhadaa ilkahooduna waxay yihiin 14 labadii sentimeterba; tigidhada dhexdooda waxa ku yaal sawiro ku saabsan Taalada Xaawo Taako iyo Astaanta Haweenka Addunka.

3. Qiimaha iyo tirada tigidhadaa la daabacay waa:

Sh. So. 0,50 tirada la daabacay waa 100.000 midh.

Sh. So. 2,30 tirada la daabacay waa 100.000 midh.

Qodobka 2aad

Tigidhada kor ku qoran waxay soconoyaan muddo 18 bilood ah laga bilaabo 10-12-1975 waxayna dhacayaan 20-6-1977.

XOGHAYAHA DAWLADDA

Wasaaradda Boostada iyo Isgarsiinta

*Dr.Cabdullahi Cosoble Siyaad*

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN ISGARSIIN OEGYSIIS WIXII LA MID AH

### WASAARADDA WARSHADAHA

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga Ir, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Abdulla of Bond Street, Limited, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

« ABDULLA LABEL ».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Abdulla of Bond Street, Ltd., saldhiggeedu yahay 100 Park Avenue, New York, N. Y., 10017 U. S. A. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: « ABDULLA LABEL ».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha acabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

*(1 Bis)*

WASAARADDA WARSHADAHA

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Abdulla of Bond Street Limited, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkadaas loo ilaaliyo sumada Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman:

« ABDULLA » (Word mark in block letter).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta,

xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Abdulla of Bond Street Ltd.

saldhiggeedu yahay 100 Park Avenue, New York N. Y., taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dahn, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «ABDULLA» (Word mark in block letters).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saakartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta babka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: White Hudson and Company Limited, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «HACKS (Word mark in block letters).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaaman sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey..

Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: White Hudson and Company Limited, saldhiggeedu yahay Shakespeare Street, Southport, Lancashire England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku ilmaaman: «HACKS» (Word mark in block letters).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 37.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: White Hudson and Company Limited, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «HACKS DEVICE».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan canshuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Shakespeare Street, Southport, Lancashire England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «HACKS DEVICE».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 37.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: F. Hoffmann La Roche & Co. Ltd Company, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumdada Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «PERTUNAL» (Word mark in block letters).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: F. Hoffmann La Reche & Co. Limited, saldhiggeedu yahay 124 Grenzacherstrasse, Basle, Switzerland, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «PERTUNAL» (Word mark in block letters).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

(5)

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: F. Offmann la Roche & Co. Limited Company, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «CLAFANONE» (Word mark in block letters).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadd: F. Hoffmann La Roche & Co. Limited, saldhiggeedu yahay 124 Grenzacherstrasse, Basle, Switzerland, taa oo si hagaagsan u keensatay ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «CLAFANONE (Word mark in block letttrs).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 48.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

# XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Philip Morris Incorporated Company, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo suumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «Philip Morris Red Label».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaado sumad ganacsi siinayaa shrikdda: Philip Morris Incorporated & Co. saldhiggeedu yahay 100 Park Avenue, New York, N. Y. 10017 U.S.A. taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtirqduna markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «PHILIP MORRIS RED LABEL».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Philip Morris Incorporated, markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku ilmaaman:
« BLACK & WHITE LABEL ».

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Philip Morris Incorporated, saldhiggeedu yahay 100 Park Avenue new York N. Y. 10017 (U.S.A.,)

taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiis sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 16-9-1975, saacaduna ahayd 8,30, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «BLACK & WHITE LABEL».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Pimm's Limited, markay taariikhdu ahayd 8-911975, saacaduna ahayd 13.00, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «PIMM'S No. 1 ,CUP» (Word & numeral).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Pimm's Limited, saldhiggeedu yahay 63 Pall Mall, London Swiy 5hz England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman:

« PIMM'S No. 1, CUP» (Word & numeral).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku qoran: 39.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballeggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA WARSHADAHA

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Maxmood ahna wakiilka shirkadda: Tanqueray Gordon & Co. Limited, mar-

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, kay taariikhdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13,00, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: «VODKA LABEL».

xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi sii nayaa shirkadda: Tanqueray Gordon & Co. Limited, saldhiggeedu yahay 260-266 Goswell Road, London E. C. I. England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi sharciga ahaa oo dhan, Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca markay taariikhdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaaman: «VODKA LABEL».

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku oran: 39.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saababka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

*(10)*

WASAARADDA WARSHADAHA

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Sumadaha Ganacsiga lr, 3 soona baxay 22kii Jennaayo 1955, kuna saabsan Sumadaha Ganacsiga;

ISAGOO ARKAY Arjiga uu keenay Wasaaradda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ganacsiga iyo Ikhtiraaca Jaalle Axmed Sheikh Max-mood ahna wakiilka shirkadda: Crosland Filters Limited, markay taa-riikhdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13,00, kaa oo uu araba in isla shirkaddaas loo ilaaliyo sumadda Ganacsiga oo hoos ku tilmaaman: « CROSLAND » (Word).

ISAGOO ARKAY Xaashida tilmaanta sumadda, caddeynta ilaalinta, xaashida wakiilnimada iyo tan cashuurta dawladda lagu bixiyey. Wuxuu shahaaddo sumad ganacsi siinayaa shirkadda: Crosland Filters Limited, saldhiggeedu yahay Claisdale Drive, Biborough; Nottingham England, taa oo si hagaagsan u keensatay arji ay ku lifaaqan yihiin xaashiyahiisi shar-ciga ahaa oo dhan, Wasaaardda Warshadaha — Faraca Sumadaha Ga-nacsiga iyo Ikhtiraaca markay taar.khdu ahayd 8-9-1975, saacaduna ahayd 13,00, si loogu ilaaliyo Dalka Jamhuuriyadda Sumadda hoos ku tilmaa-man: «CROSLAND» (Word).

Sumadda iyada ah waxay ku soo bixi kartaa nooc iyo qiyaas kasta, waxaana lagu sumadeyn karaa alaabada ama miraha tacabka oo ku xusan kalaaska ama hoos ku oran: 32.

Sumadda iyada waxaa kaloo la socon karaa hantida ama siglaha weydiistaha, waxaa kaloo lagu daabici karaa xaashiyaha ganacsiga, Saa-babka (imballaggi) resiidyada, bakhshadaha, waxay kaloo ku soo bixi kartaa naadada ii-dhahda iyadoo sawir ah lehna nooc iyo qiyaas kasta ama sidii kaloo ku habboon.

XOGHAYAHA DAWLADDA

*Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*BEDDELAAD NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmed Maxamuud Macallim, maalintii 19-3-1966, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaaq Shiid, Jidka Balcad, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolaar, addimihiisuna ahaayeen 45x40, kuna fadhiye 1800 mdh., sababtoo ah in uu is-Beddelay qorahihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD–237-9-15-68 ee 13 Juunyo 1968 baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhuulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 60x20, kuna fadhiya 1200 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhulka uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Siyaad.

Koofur waxaa ka xiga: Jaalle Maxamed Jumcaale G. L. 489-66.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad.

Muqdisho, 10 Dishembar 1975.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydhane*

*(12)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caasha Xaaji Faarax Xasan, u uso qortay qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2-12-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas Afar-geesi siman 27x27 kuna fadhiya 729 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Dishembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydane*

*(13)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Saciid Cabib Caateeye, u usoo qortay Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2-10-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas afar gees siman 28x28 kuna fadhiya 784 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay lamb. 58.
Koofur waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay lamb. 60.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 Dishembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Ibrahim Cige Maydane*

*(14)*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Maxamed Cabduraxmaan, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 4-12-1976, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Xamar Jab-Jab, oo leh qiyaas ah afar gees siman 12x12 kuna fadhiya 144 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Mooska.

Koofur waxaa ka xiga: Sheekh Muxiddin Sheekh Maxamed.

Galbed waxaa ka xiga: Qulateen Cusmaan.

Bari waxaa ka xiga: Waddo caadi ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Dishembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydane*

*(15)*

---

## *NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Diiriye Laalac, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2-9-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangólaar 28x25, kuna fadhiya 700 mdh.

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Xaaji.

Bari waxaa ka xiga: Maxamed Saalax X.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Dishembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydane*

*(16)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Saalax Xuseen, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 2-9-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar 28x25, kuna fadhiya 700 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lambar 52 K.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 20 Dishembar 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Ibrahim Cige Maydane*

*(17)*

MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

HADDU: Arkay dacwada horey ku qoran.

MARKUU arkay wax a ay ku saabsan iyo ogeysiiskii, Bangiga (eeg warq. Bangiga L. 00294) Bangiga ganacsiga Laanta Kowaad, wuxuu ogaday in ay ahay shaqadiisa.
HADDU: Arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2.

WUXUU CADEYNAYAA

In jeega wareega ee Lam. 012532 oo ay ku qoran tahay di Shs. So. 700 (todobaboqol), iskana lahaa Xasan Ceelo Geedow.

WUXUU AMARAYAA

In loo sameeyo jeeg wareega ee cusub ninka kor ku magacaaban, 15 maalmood ka dib markii amarkaan lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeega wareega ee la sameyn doono gacanta laga saaro Xasan Ceelo Geedow ama qof isla asaga ka sita wakalaad Sharci ah ayado la sugaayo 15ka maalmood ee kor lagu soo xusay.

Muqdisho, 15 Jenayo 1976.

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Xamar

*Jaalle Cabdullahi Daahir Barre*

*(17 Bis)*

## MAXKAMADDA GOBOLKA XAMAR

HADDU: Arkay dacwada horey ku qoran.

MARKUU: Arkay waxa ay ku saabsan iyo ogeysuuskii bangiga (eeg warq. bangiga L. 704), bangiga Keyda L. 2aad iyo Amaahda, wuxuu ogaaday in ay tahay shaqadiisa.

HADDU: Arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2.

WUXUU CADEYNAYAA

In Buuga Keyda ee Lam. 11020 oo ay ku qoran yahay Shs. 3.000 (sedexkun), iskana ahaa Xasan Cabdullahi Cilmi.

WUXUU AMARAYAA

In loo sameeyo Buuga Keyda ee cusub ninka kor ku magacaaban 15 malmood ka dib markii amarkaan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buuga Keyda ee la sameyn doono gacanta laga saaro Xasan Cabdullahi Cilmi ama qof isla asaga ka sita Wakaalad sharci ah ayado la suggaayo 15 malmood.

Muqdisho, 15 Jenayo 1976.

Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Xamar

*Jaalle Cabdullahi Daahir Barre*

*(17 Bis)*